



Inta lagu jiro baaritaanka

HELIDA MAGANGELYADA







- Haddii aadan ku laaban karin dalkaga sababtoo ah uu khatar kugu yahay, **waxaad halkan ka codsan kartaa magangelyo.**
- Haddii aad timaaddo adigoon wadan baasaboorka ama fiisaha, waa inaad martaa **4 baaritaan oo kala sooc ah.**





Haddii aad ka yar tahay 18 jir oo aad kaligaa timaadday, isla markiiba u sheeg booliska.

Waxa lagu siin doonaa qof lagu magacaabo **masuulka** si uu kuu taageero.

BAARITANKA AQOONSIGA & AMAANKA

-  Sarkaal boolis ama xuduud ilaaliye ayaa ku weydiin doona **magacaaga, da'daada, halkaad kasoo jeedo iyo faahfaahinta safarkaaga.**
-  **Waxay qaadi doonaan sawirkaaga iyo farahaaga** haddii aad ka weyn tahay 6 sano.
-  **Waa lagu baari karaa,** alaabahagaana si ku-meelgaar ah ayaa loo hayn karaa ilaa baaritaanku dhammaado.
-  **Tus dukumiintiyadaada oo dhan,** sida kaarka aqoonsiga ama shahaadada dhalashada, xitaa haddii ay sawir yihiin oo ku jiraan taleefankaaga.

BAARITAANKA CAFIMAADKA & BAAHIDA

-  **Dhakhtar ama kalkaaliye ayaa hubin doona** haddii aad qabto cudurro ama dhibaatooyin caafimaad.
-  **La wadaag waraaqahaga cafimaadka** ama kaarka talaalka hadii aad heyso.
-  **Shaqaaale tababaran ayaa ku caawin doona.** U sheeg haddii aad dareento walwal, murugo, cabsi, ama aad raadinayso xubnaha qoyskaaga.
-  **Wixii aad la wadaagto waxay ahaan doonaan qarsoodi** oo lalama wadaagi doono wadanka aad ka soo jeedo.



Hubitaankani wuxuu qaadan karaa ilaa **7 maalmood.** Inta lagu jiro waqtigan, waxaad joogaysaa goobta baaritaanka.

XASUUSO

- ✓ Haddii aad codsatay magangelyo, mas'uuliyiinta khuseeya waa inay si degdeg ah kuu diiwaangeliyaan.
- ✓ Raadso qareen si uu ku siiyo talo sharci iyo turjubaan haddii aadan fahmin luuqadda. Waxay kuugu adeegi doonaan bilaash.
- ✓ Qof kasta oo halkan ka shaqeeya waa inuu ku ixtiraamaa.
- ✓ La shaqee saraakiisha oo weydii inay kuu sharxaan haddii wax ay yiraahdaan aadan fahmin.
- ✓ Haddii aad rabto inaad dib ugu noqoto dalkaaga, weydii saraakiisha inay kaa caawiyaan inaad ogaato fursadaha kuu bannaan.

